

## Heshiiska Meelaynta Placement Agreement

CUNUGA(CARRUURTA) / DHALLAANKA LA MEELAAYAY	TAARIKHDA DHALASHADA	CUNUGA(CARRUURTA) / DHALLAANKA LA MEELAAYAY	TAARIKHDA DHALASHADA
Waxaa lagu meeleeyay:			

**Heshiiskan Meelaynta waxaa uu bixiyaa macluumaad muhiim ah oo lagama maarmaan ah si loo hubiyo bedqabka iyo wanaagga cunuga gurigaaga lagu meelaayay. Macluumaadka ku saabsan cunuga ama qofka dhallinyarta ah ama qoysaskooda waa qarsoodi oo waa in kaliya lala wadaago dadka sida tooska ah ugu lug leh qorshaha kiiska. Kala tasho shaqaalaha kiiska lagu qoondeeyay caawimaadda ku saabsan macluumaad la wadaagista dadka kale.**

### Macluumaadka Xiriirka:

#### Xiriirrada Joogtada ah iyo Baahiyada Maalinlaha ah

Shaqaalaha kiiska cunuga daryeelkaaga lagu meelaynayo waa . Waxaad kala xiriiri kartaa telefoonka ama email-ka. Waxay ka shaqeeyaan dibedda xafiiska. Lambarka telefoonka xafiiska waa . Xafiisku wuu furan yahay inta lagu guda jiro saacadaha caadiga ah ee shaqada Isniin – Jimco, 8:00 subaxnimo - 5:00 galabnimo.

#### Xiriirrada Xaaladda Degdegga ah

Xaaladaha degdegga ah ee meelaynta waqtiga maalintii, fadlan la xiriir shaqaalaha kiiska ama xafiiskiisa. Hubso in ka hadasho in aad ku sugan tahay xaalad meelayn oo degdeg ah iyo in aad si degdeg ah qof ula hadasho.

Xaaladaha degdegga ah ee meelaynta ka-dib saacadaha shaqada ka-dib ama soo sheeg xad-gudubka ama dayaca carruurta 5:00 galabnimo – 8:00 subaxnimo, Isniin ilaa Jimco, iyo dhamman saacadaha maalmaha fasaxa ee toddobaadka iyo fasaxyada, kala xiriir Qaadasahda Dhexe 1-800-301-1868.

Haddii adiga ama qof gurigaaga jooga uu khatar ku jiro ama xaalad caafimaad degdeg ah uu ku sugan yahay, wac 911 ka-dibna codso caawimaadda booliska.

### Shuruudaha Carruurta iyo Dhallinyarada 30ka Maalmood ee ugu Horreeya Meelayntooda

Waxaa jira shuruudo gaar ah 30 maalmood ee ugu horreeya ee cunuga ama qofka dhallinyarada ah ee dhowaan qoyskiisa laga soo wadey.

Waxaan oggolahay in aan:

- Qabso oo imow ballamaha loo baahan yahay ee hoos lagu calaamadeeyay oo raac dhammaan soo-jeedimada laga wada hadley intii ballamaha lagu guda jiray.

Ku wargeli shaqaalaha kiiska ee loo qoondeeyay walaacyo, soo-jeedimo, iyo la-socosho kasta ee lagu sheegay ballamaha.

#### Loo baahan yahay

<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Baaritaanka Caafimaadka Hore sida ugu dhakhsiyaha badan ee suuragalka ah; kama dambeys 5 maalmood ka-dib gelitaanka hore ee daryeelka. Loo baahan yahay marka cunuga uu qabo jiro aan degdeg ahayn, arrin caafimaad oo daba-dheeraata, dhaawac, ama walaac caafimaad. Arrimaha degdegga ah waa in lagu daaweeyaa Waaxda Xaaladaha Degdegga ah ama Daryeelka Deg-degga ah. (Haddii EPSDT lagu dhammeeyo shanta maalmood ee ugu horreeyo, Baaritaanka Caafimaadka Hore looma baahna).
<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Baaritaanka Ubadka-Fayow ee loo yaqaanno Daaweynta iyo Baaritaanka Muddo-Ka-dib Mar La Sameeyo ee Hore (EPSDT) ayaa loo baahan yahay 30 maalmood ee ugu horreeyo ee daryeelka guriga ka baxsan.
<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Ku samee baaritaanka ilkaha 60 maalmood gudahooda.
<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Baaritaanka hawlweedenka barnaamijka Raadraaca Caafimaadka Carruurta iyo Waxbarashada (CHET). Ogow: Baaraha CHET ayaa kula soo xiriiri donna si uu ballan kuula sameysto.

## Shuruudaha Joogtada ah ee Carruurta iyo Dhallinyarada

Waxaan oggolahay in aan:

- Jadwaleyso oo ka soo qaybgal adeegyada Caafimaadka Dhimirka, ilkaha, caafimaadka guud ee joogtada ah, oo uu ku jiro baaritaanka [EPSDT](#) iyadoo la raacayo jadwalka baaritaannada ee lagu taliyay:
  - 6 baaritaanno sannadka koowaad ee nololaha (markuu dhasho; marka uu jiro 1, 2, 4, 6, iyo 9 bilood);
  - 5 baaritaanno inta u dhaxeysa da'da 1 iyo 3 sano (marka uu jiro 12, 15, 18, 24, iyo 30 bilood);
  - Baaritaannada sannadlaha ah ee u dhaxeeya da'da 3 iyo 20 sano.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa <https://www.dcyf.wa.gov/services/health-for-youth/epsdt>.

Isticmaal [Fawjarka Farmashiyaha Ku-meelgaarka ah iyo Adeegyada Caafimaadka ee Carruurta la Korsado](#) si aad ballamo u sameysato ama u soo qaadato daawooyin uu dhakhtar ku uqoray, ilaa aad ka helayso kaarka Provider One ee cunuga. Haddii aadan fawjar helin, booqo [Mareegtada Daryeelka La Isku Duwariday](#) oo fawjar daabac, <https://bit.ly/3NGFyf>

- Cunuga ama qofka dhallinyarada ah haku sii qornaado iskuulka ay hadda dhigtaan haddii si kale uu shaqaalaha kiisku sheego mooyaane. La hadal shaqaalaha kiiska, haddii aad aaminsan tahay in iskuul cusub loo baahan yahay in laga wada hadlo.
- Taageer xiriirka uu cunuga ama qofka dhallinyarada ah uu la leeyahay waalidiintiisa iyo walaalhiisa adiga oo taageeraya Waqtiga Qoyska (booqashooyinka).
- Taageer baahiyada gaarka ah ee cunuga ama dhallinyarada ee ku saabsan isirka, diinta dhaqanka, dookha galmo, iyo aqoonsiga jinsiga. Kuwan waxaa ka mid ah dhaqanka, waxbarashada, iyo hawlaha ruuxiga ah ee gurigaaga iyo bulshadaada, oo ay ku jiraan hawlaha qabiilka ee gudaha bulshada qabiilka cunuga ama qofka dhallinyarada ah ama qoyska qabiilka ballaaran.
- Weyddii shaqaalaha kiiska caawimaad haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo maareynta hab-dhaqannada cunuga ama qofka dhallinyarada ah. Waxaa laga yaabaa in aadan isticmaalin wax ciqaab jireed ah.
- Ka-qaybgal kulamada qorsheynta ee la wadaago. Kulanka qorsheynta la wadaago waa fursad aad ku bixin karto talo iyo fikrad ku saabsan bedqabka cunuga ama qofka dhallinyarada ah, joogtaynta, iyo wanaagga cunuga.
- U sheeg shaqaalaha kiiska:
  - Walaacyada khuseeya cunuga ama qofka dhallinyarada ah, sida xadgududka, dayacaadda, caafimaadka, hab-dhaqanka, horumarka, ama arrimaha waxbarasho.
  - Marka aad u baahan tahay in lagaa taageero daryeelka cunuga ama qofka dhallinyarada ah. Weyddiinta taageero iyo caawimaad waa qayb caadi ah oo ka mid ah hawlaha waalidka oo macnaheeda ma ahan in aadan awoodin in aad daryeesho cunuga ama qofka dhallinyarada ah.
  - Haddii cunuga ama qofka dhallinyarada ah uu u baahan yahay in uu gurigaaga ka guuro, waxaad siisaa ogeysiis ugu yaraan 14-maalmood ah shaqaalaha kiiska ee loo xilsaaray cunuga, haddii ay jiro xaalad degdeg ah mooyaane, si loo hubiyo in ay dhici karto qorsheyn habboon.

## Shuruudaha Carruurta yaryar min Eber ilaa Hal Sano

Waxaan oggolahay in aan:

- Raac tilmaamaha hurdada ammaanka ah  
\_\_\_\_\_ Halkan ku qor xarfaha hore ee magacaaga si aad u xaqiijiso in aad fahamsan tahay Hurdo Ammaan ah iyo in aad oggoshahay in aad raacdo hab-dhaqannada ku qoran [Tilmaamaha Hurdo Ammaan ah](#). Waxaad kuwan ka heli kartaa [https://www.nichd.nih.gov/sites/default/files/2019-02/Safe\\_Sleep\\_Environ\\_update.pdf](https://www.nichd.nih.gov/sites/default/files/2019-02/Safe_Sleep_Environ_update.pdf).
- Daawo [fiidiyowga Muddada ay Carruurta Aadka u Oyso](#) oo raac istiraatiijiyadaha Oohinta Aadka ah ee carruurta. Waxaad kani ka heli kartaa <http://www.purplecrying.info/what-is-the-period-of-purple-crying.php>.  
\_\_\_\_\_ Halkan ku qor xarfaha hore ee magacaaga si aad ugu xaqiijiso in aad daawatey fiidiyowga Muddada ay Carruurta Aadka u Oyso, in aad fahamtay fikradaha iyo in aad oggoshahay in aad raacdo istiraatiijiyadaha looga hadlay fiidiyowga.
- Raac Qorshaha Daryeel Ammaan ah (marka ay habboon tahay)  
\_\_\_\_\_ Halkan ku qor xarfaha hore ee magacaaga si aad u xaqiijiso in lagugu darey diyaarinta Qorshaha Daryeelka Ammaanka ah.  
\_\_\_\_\_ Halkan ku qor xarfaha hore ee magacaaga si aad u xaqiijiso in aad heshay nuqulka Qorshaha Daryeelka Ammaanka ah.

## Shuruudaha Qaraabada ama Daryeelayaasha Aan Shatiga Haysan Kale ee Habboon

Waxaan oggolahay in aan:

- Samee hubinta raadraaca taariikhda dembiyada iyo hubinta xadgudubka iyo dayacaadda ilmaha ee dhammaan shakhsiyaadka da'doodu tahay 16 sano jirka ah iyo kuwa ka weyn ee laga yaabo in ay cunuga ama qofka dhallinyarada ah ay gaari karaan iyaga oo aan lala joogin. [Eeg Hagaha Hawlaha Waalidka ee Garashada Ku Dheehan](#).
- Hubso in dhammaan xubnaha reerka ee looga baahan yahay in ay sameeyaan sawirka faraha in ay yimaadaan ballantooda faraha iyo in ay faraha soo gudbiyaan kama dambeys 10 maalmood ka-dib ansaxinta meelaynta.
- Ku wargeliyo Shaqaalaha Kiiska loo xilsaaray isbeddelo kasta ee ku yimaada shakhsiyaadka deggan guriga si loo sameeyo hubinta raadraaca taariikhda dembiyada iyo hubinta xadgudubka iyo dayacaadda ilmaha.
- Si firfircoon uga qaybqaado Daraasadda Guriga Qoyska ee loo marayo Qaybta Shati-bixinta.
- In aan u oggolaado DCYF in ay gurigeysa soo gasho iyo in ay aragto cunuga ama qofka dhallinyarada ah ee jooga gurigeysa.

Waxaan daneynayaa in aad noqdo qof shati u haysta daryeelka cunuga ama qofkan dhallinyarada ee gaarka ah.

Haa  Maya

Waxaan helay nuqulka foomka Macluumaadka Cunuga / Gudbinta Meelaynta [DCYF 15-300](#). Haa  Maya

## Shuruudaha DCYF

DCYF waxay oggoshahay:

- In ay ku siiso macluumaadka la ogyahay ee la heli karo ee ku saabsan baahiyada caafimaadka, waxbarashada, nafsaani-bulsho iyo midda hab-dhaqanka ee cunuga ama qofka dhallinyarada ah.
- In ay diyaariso Qorshaha Taageerada Daryeelaha [DCYF 10-428](#) haddii aad daryeelayso cunug caafimaad ahaan nugul.
- In ay ku siiso ogeysiiska dhageysiyada maxkamadda, kulannada qorsheynta la wadaago, iyo waqtiga qoyska waqti habboon.
- In ay ku siiso macluumaadka ku saabsan:
  - Shatiga daryeelka korsashada <https://www.dcyf.wa.gov/services/foster-parenting>
  - Tababarka loo mara Alliance <https://cpe.socialwork.uw.edu/alliance-courses>
  - Taageerada daryeelka ee loo marayo Alliance CaRES <https://alliancecares.org/>
  - Dheefaha Maaliyadeed ee TANF
  - Caymiska Caafimaadka / Medicaid
  - Adeegyada kale ee la heli karo
- Samee Daraasada Guriga Qoyska.

Cunuga ama qofka dhallinyarada ay hayso DCYF waanna laga saari karaa haddii maxkamaddu ay go'aamiso:

- Caafimaadka, bedqabka ama wanaagga ayaa la burburin doonaa,
- Meelaynta ayaa carqaladeynaysa dedaallada dib u midoobidda,

Ama haddii cunuga lagu meeleeeyo Heshiiska Meelaynta Iskaaga ah (VPA):

- Go'aan ayaa laga gaarin in meelaynta aysan ku jirin danaha ugu wanaagsan ee cunuga/dhallaanka,
- Qayb kastoo ka mid ah heshiiskan la jebiyo.

## Saxiixyada

DARYEELAHA	DARYEELAHA	SHAQAALAHA KIISKA LOO XILSAARAY
TAARIIKHDA	TAARIIKHDA	TAARIIKHDA

## Macluumaad Taageero oo Dheeraad Ah

- La soco kharashaadka gaadiidka ee ku qoran foomka Lacag-celinta Gaadiidka Bilaha ah ee Daryeelaha ee laga heli karo [https://www.dcyf.wa.gov/forms?field\\_number\\_value=07-090&title=](https://www.dcyf.wa.gov/forms?field_number_value=07-090&title=).
- Codso fawjarka dharka ee carruurta ama dhallintarada ku jirta meelayntooda ugu horreysa.
  - Daryeelayaasha waxay codsan karaan fawjarrada dharka haddii cunuga ama qofka dhallinyarada uu leeyahay baahi dhar oo gaar ah oo aanan haqabtiri karin kheyraadyada bulshada ee degaanka ama gunnada dharka ee caadiga ah ee ku jirta lacag-bixinta bilaha ah ee daryeelka korsashada (haddii cunuga lagu meeleeeyo guri carruurta lagu koriyo oo shati-haysta).
  - Si aad u hesho caawimaadda helidda adeeg-bixiye ama isuduwidada baahiyada caafimaadka hab-dhaqanka ama caafimaadka kale, la xiriir Apple Health Core Connections (AHCC): Wac 1-844-354-9876, ka-dibna riix 1 ka-dibna geli khadka dheeraadka ah ee 6102194
  - Email-ka [AHCCTeam@coordinatedcarehealth.com](mailto:AHCCTeam@coordinatedcarehealth.com).
- Kaarka caynsanaanta caymiska caafimaadka cunuga ama qofka dhallinyarada ah ayaa boostada laguugu soo diri doonno.
  - Daryeelayaasha ayaa boostada loogu soo dirayaa kaarka caymiska caafimaadka. Inta aad kaarka sugayso, waxaad weyddiin kartaa shaqaalaha kiiska in aad ka eegto lambarka aqoonsiga Provider One or Apple Health Core Connections ee cunuga ama qofka dhallinyarada ah FamLink.
- Isticmaal Diiwaanka Caafimaadka ([https://www.dcyf.wa.gov/forms?field\\_number\\_value=10-455&title=](https://www.dcyf.wa.gov/forms?field_number_value=10-455&title=)) si aad u diiwaangeliso ballamaha daryeelka ilkaha/caafimaadka, xiriirrada, iyo soo-jeedimada laga helo ballamaha.

- La xiriir barnaamijka Taageerada, Waxbarashada, iyo Ku-negaanshaha Daryeelaha ee Alliance (CaRES) si aad u hesho taageero bilow ilaa dhammaadka safarkaaga korinta ama Xigtonimada. Waxay daryeelayaasha ku xiraan la-taliyayaal asaagooda ah kuwaas oo dhageysan kara, a xallin kara dhibaatoooda, oo ka caawin kara aqoonsashada kheyraadyada maxalliga ah. Booqo mareegtada CaRES si aad u hesho macluumaad ku saabsan kooxaha taageerada, dhacdooyinka, iyo kuwo kaloo badan!
  - Booqo mareegtada CaRES <https://alliancecares.org/>
  - Email-ka [alliancecares@uw.edu](mailto:alliancecares@uw.edu)
  - Wac 206-221-4913
- Macluumaad iyo kheyraad dheeraad ah ayaa laga heli karaa bogagga Daryeelka Xigtada iyo Hawlaha Waalidka Korsashada ee DCYF <https://www.dcyf.wa.gov/services/foster-parenting>.



This certifies that / Tani waxay caddeynaysaa in

\_\_\_\_\_

Is a Caregive with the State of Washington  
Department of Children, Youth, and Families  
In uu yahay Daryeele la shaqeeya Gobolka Washington  
Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska

\_\_\_\_\_  
*Authorizing Signature LIC\_0014A (08-2020)*

\_\_\_\_\_  
*Expiration Date (One Year)*

*Saxiixa oggolaanshaha LIC\_0014A (08-2020) Taariikhaha Dhicitaanka (Hal Sano)*